

**Xeer - Sharci 30 Juunyo 1060, lamba. 2 diiw.**

**Sameeyey (unkay) billadda Xidigta Soomaaliya.**

## **MAAMULUHU**

Markuu Aqoosaday baahida iyo degdegsiimaha loo abo in in lagu dhaqaaqo soo-saaridda xeerar nidaamiya unkidda billadda Gobeed, ee Xidigta Soomaaliya;

Markuu dhegeystay Golaha Wasiirrada;

Dhegeystay soojeedinta Wasiirka Kowaad;

Asaga oo cuskanaya awoodda uu siinayo Qod. 8aad, ee Amargooyada 5 Jenaayo 1956, lamba. 2;

## **WUXUU XEERAYAA**

### **Qod. 1**

Waxaa la unkay (sameeyey) billadda Xidigta Soomaaliya oo ku wajahan in aqoonsi shahaado sharaf ah lagu maamuuso kuwa shaqo khidmo khaas ah u qabtay Soomaaliya.

### **Qod. 2**

Madaxa Maamuuska waa Madaxweynaha Jamhuuriyadda.

Maamuuska waxaa maamula Gole ka kooban hal kaaliye, oo shirguddoominaya iyo lix xubnood.

Kaaliyaha iyo lixda xubnood waxaa Xeerku magacaabaya Madaxweynaha Jamhuuriyadda, ayada uu ku saleysan soojeedinta Wasiirka Kowaad, oo dhegeystay Golaha Wasiirrada.

### **Qod. 3**

Nidaam-maamuuseedka waxa uu ka kooban yahay shan qaybood:

- Faariska Xidigta Weyn;
- Sarkaal weyne;
- Hawlkar Qaran;
- Faaris Sarkaal
- Faaris

Maamuusyo sare waxaa la siin karaa Faarisiyiinta Xidigta Weyn caleema-saarka Gasiirka Weyn.

### **Qod. 4**

Asaga oo ku saleynaya soojeedinta Wasiirka Kowaad, dhegeystay Golaha Wasiirrada iyo Golaha Maamuus-sharafeedka, Madaxweynahawaxa uu xeer kiisa ah ku goynayaa tirada ugu badan billad-sharafeedyada oo la bixin karo sanad weliba oo u kala soocan qaybaha Nidaam-maamuuseedka.

### **Qod. 5**

Maamuus-sharafeed waxaa lagu bixinayaa xeer uu soo saarayo Madaxweynaha Jamhuuriyadda, ayada oo lagu saleynayo soojeedinta Wasiirka Kowaad, ama “iskiis”.

Xaaladda kowaad, ayada oo la dhegeysta Golaha Nidaam-maamuuseedka.

Bixinta iskiiska ah waa in tixraacaan maamuus-sharafeedyada aan caadiga ahayn kamana badnaan karin tirade Maamuus-sharafeedyada oo labaatankiiba halo o la goynayo sanad waliba sida uu qabo Qod. hore.

Maamuus-sharafeedyadu lama siin karo Xildhibaannada iyo la-taliyaasha Dowwladda Hoose, inta lagu gudajiro muddo xileedkooda.

#### **Qod. 6**

Waa luminayaa Maamuus-sharafeedka qofka lagu maamuusay haddii uu ku sifoobo mid aan u qalmin.

Kala-noqoshada waxaa loogu dhawaaqaya xeerka Madaxweynaha, ayada oo lagu saleynayo soojeedinta Wasiirka Kowaad, lana dhegeysto Golaha Maamuus-sharafeedka, si kastaba, kaddib lagu rido xukun ciqaaba oo dhaqangal noqday oo la xiriira dembi ulakac ah.

#### **Qod. 7**

Xeerka dhismaha Nidaam-maamuuseedka waxaa lagu oggolaanaya (ansixinayaa) Xeer uu soo saaro Madaxweynaha Jamhuuriyadda, ayada oo lagu saleynayo soojeedinta Wasiirka Kowaad, la dhegeystay Golaha Wasiirrada iyo Golaha Nidaam-maamuuseedka.

#### **Qod. 8**

Xukuumadda waxa ay u-idman tahay in ay soo saarto xeerarka loogu baahan yahay hirgelinta Xeerkan – Sharci.

#### **Qod. 9**

Xeerkan – Sharci oo dhaqangelaya taariikhda lagu nashriyo Faafinta Rasmiga waxaa la hordhigayaa golaha Xeerdejinta si loogu rogo (beddelo) sharci, ugu dambeyn bilowga kalfadhiga Golaha Xeerdejinta, oo ku xiga taariikhda isagaas nashrintiisa.

Xagga Maamulaha

Waxaa u saxiixay **Gasbarri**

Muqdisho, 30 Juunyo 1960.

Wasiirka Kowaad

**Cabdullaahi Ciise Maxamuud**

Waa arkay oo diiwaageli – diiw. lamba. 23, xaashi lamba. 70.

Muqdisho, 30 Juunyo 1960.

Hantidhowraha: **Spadaro**